# Qaybta Khayraadka Naafada Horumarineed ee Naafada Korriinka adeegyada laga cafiyay

Luuliyo 2025

NEBRASKA
Good Life. Great Mission.

## Kaliya Isu-duwidda Adeegga

Khayraadkani wuxuu bixiyaa macluumaad ku saabsan adeegsiga Kaliya Isu-duwidda Adeegga oo lala xiriirinayo Waaxda Naafanimada Horumarineed (DDD). Qof xaq u leh wuxuu dooran karaa inuu helo Isu-duwaha Adeegyada Naafanimada Horumarineed (DD) xitaa iyadoo aan ku jirin kharash ka-dhaafidda. Marka qof uu rabo isu-duwidda adeegga, Ururka Maareynta Daryeelka (MCO) ama Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada (DHHS) ayaa u magacaabta mid. Maareeyaha Kiiska ama Isu-duwaha Adeegga (SC) wuxuu ka caawiyaa helidda khayraadka wuxuuna dhiirrigeliyaa madaxbannaanida, wax-soo-saarka, iyo ku dhex milanka bulshada.

A. Dadka aan ka qaybgalin kharash ka dhaafida Adeegyada Medicaid ee Guriga iyo Adeegyada bulshada ku salaysan (HCBS), adeegyada isu-duwidda waxaa lagu bixin karaa saddex qaab:

1. Maareynta Kiiska waa adeeg lagu kafaali-qaadi karo Qorshaha Gobolka Medicaid oo loogu talagalay dadka ku jira Medicaid isla markaana raba isu-duwidda adeegga. Shakhsiyaadka waxay adeeggan ku heli karaan iyagoo la xiriirayaan MCO-ga ay ku jiraan.
2. Marka qofka aanu rabin inuu ku helo Maareynta Kiiska MCO-giisa, waxaa loogu magacabi karaa Isu-duwe Adeeg (SC) iyada oo loo sii marayo DDD.
3. Marka qof aanu u qalmin Medicaid balse uu jeclaan lahaa inuu helo isu-duwidda adeegga, wuu heli karaa isaga oo adeegga ku bixinaya lacag ku saleysan inta uu ku bixin.

   a. Awoodda kharash bixinta waa qadarka ay Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada (DHHS) u go'aamiso qof 19 jir ama ka weyn inuu bixiyo si uu u helo isu-duwidda adeegyada Naafanimada Horumarineed (DD), marka uu buuxiyo shuruudaha u-qalmitaanka DD balse aanu u qalmin Medicaid.

   b. Isu-duwe Adeeg (SC) looma magacaabi doono ilaa:
      i. Awoodda bixinta la go'aamiyo.
      ii. Qofka lagu wargeliyo qadarka uu bixinayo.
      iii. Qofka uu oggolaado inuu bixiyo.

   c. Marka qof uu helo Kaliya Isu-duwirida Adeegga oo uu waayo u-qalmitaanka Medicaid, Isu-duwaha Adeegga (SC) ayaa ka caawin doona buuxinta waraaqaha lagu go'aaminayo awooddiisa bixinta.
   d. Qofka helaya Iskuduwidda Adeegga oo keliya iyada oo loo marayo awoodda bixinta waxaa bishii loo soo rogi doonaa biil adeegga.

B. Shuruudahan soo socda waa in la buuxiyaa si loo helo Isu-duwidda Adeegyada Naafanimada Horumarineed:

1. Qofku waa inuu haystaa Medicaid ama oggolaadaa inuu ku bixiyo qaabka awoodda qadar bixinta;
2. Qofku waa inuusan ku noolayn xarun daryeel, sida xarun daryeel dhexdhexaad ah oo loogu talagalay dadka naafo maskaxeedka ah (ICF/IID) ama xarun kalkaalinta (NF); sidoo kalena
3. Qofku waa inuusan ka qaybqaadanayn adeeg kharashaad ka dhaafid kale oo HCBS ah.

   a. Adeega Kharashaad ka dhaafida ee Da'da iyo Naafada (AD) iyo Adeega Kharashaad ka dhaafida Dhaawaca Maskaxeed ee Xun (TBI) waxaa ku jira adeega iskudabaridada.
   b. Medicaid waxay bixisaa lacagta adeegyada isu-duwidda iyadoo ku bixinaysa hal mar oo kharash-dhaafiyeed.

C. Shaqsiga asaga ayaa dooranaya in uu helaayo Adeegyada Kaliya Isku-duwirida Adeegga. Go'aanka xili walbo ayaa la gaari karaa.

1. Marka uu qofku diido Iskuduwidda Adeegga Keliya laakiin uu go'aansado inuu jeclaan lahaa inuu isticmaalo adeegyada waqti dambe, waxay codsan karaan iyagoo kala xiriiraya Xafiiska Dhexe ee DDD ee dhhs.DDDCommunityBasedServices@Nebraska.gov ama lambarka wicitaanka ee bilaashka ah ee (877) 667-6266.

D. Waajibaadka SC:

1. Dhamaystirka qiimayn sanadle ah oo ku saabsan heerka daryeelka ee Xarunta Daryeelka Dhexdhexaadka ah ee loogu talagalay dadka naafo maskaxeedka ah (ICF/IID), iyo qabanqaabinta qiimayno dheeraad ah marka loo baahdo.
2. Dhamaystirka qorshaynta adeegga iyo dejinta yoolalka adeegga iyadoo la sameynayo:
   a. Go'aaminta khayraadka ku habboon si loo daboolo baahida qofka. Tani waxaa ka mid ah taageerooyin dabiici ah (sida qoys, asxaab, ama deris) ama khayraad aan ka iman hay'ad.
   b. Diyaarinta Qorshe Ku Saleysan Qofka, kaas oo ka mid noqonaya adeegyo aan kharash ka-dhaafida balse gacan ka geysanaya gaarsiinta yoolalka qofka.
3. Wuxuu ka caawiyaa:
   a. Codsashada barnaamijyada ku jira Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada (DHHS), sida Medicaid ama Gargaar Dhaqaale;
   b. Codsashada barnaamijyo kale, sida adeegyada ururada bulshada, gargaarka guryaha, adeegyada sharci, Ceymiska Bulshada, ama Tababarka Shaqada; iyo
   c. Qorshaha Waxbarasho ee Shakhsiyeedka (IEP) ee ardayda, iyada oo la ka qaybgalayo kulan dugsigu hogaaminayo laguna heli doono nuqul ka mid ah IEP-ga.
4. Wuxuu kormeeraa Qorshaha Ku Saleysan Qofka (PCP) isagoo:
   a. Qiimeyn joogto ah ku sameeya in qorshuhu daboolayo baahida qofka;
   b. La xiriira qofka bil kasta; iyo
   c. Dib u eegis ugu sameeya qorshaha ugu yaraan hal mar sanadkii iyadoo lala kaashanayo qofka.